



# SYRACUSE CITY SCHOOL DISTRICT

Jaime Alicea, Maamulaha Guud ee Dugsiyada

Xafiiska Wax Barista iyo Waxbarashada

Laura Kelley, Madaxa Waaxda Tacliinta

Maarso 20, 2020

Qoysaska Qaaliga ah ee Dugsiga Sare,

Waxaan aad uga shaqaynaynaa inaan xaqijino in ardaydaadu awoodi doonaan inay wax bartaan inta lagu jiro waqtigan aysan awoodin inay dugsiga yimaadaan. Waxaaau samaynay ilo heer degmo waxaana ognahay in dugsiyada kaliga ah iyo macalimiinta cunugaagu ay sidoo kale siinayeen xogtaan cunugaaga si uu wax u barto asagoo guriga jooga.

Si aan uga dhigno shaqadaan mid si fudud loo fahmi karo ilaa inta suuragalka ah, waxaan abuurnay jadwal tusaalayn ah oo loogu talagalay ardayda fasalada 9-12. Jadwalku wuxuu bixin doonaa hab taageeraaya sii wadista waxbarashada, wuxuu kor u qaadayaa caafimaadka dareenka bulshada, wuxuuna dhiiri galinayaa jimicsiga jirka iyo caadooyinka caafimaadka leh. Haddii dugsiga ama macalinka cunugagau mar hore ku siiyajadwal kan ka duwan, ama aad leedahay jadwal qoyskaaga ku haboon, fadlan dareen xoriyada aad ku isticmaasho kaas beddelka mida hore.

Markay timaado waqtiga waxbarashada, **fadlan muhiimada sii wax kasta oo uu guriga usoo diray macalinka fasalka ee ilamahaga ama dugsigu.** Haddii hawlahass ay dhammaadaan, waxaad sidoo kale heli kartaa adeegyada soo socda oo uu ku siinaayo Xafiiska Degmadu. Waaad ka heli kartaa [www.syracusecityschools.com/coronavirus](http://www.syracusecityschools.com/coronavirus).

Waxaa jira dookhyo dhawr ah oo ay bixiso WCNY/PBS. Fadlan ka fiiri webseetka degmada wixii la xariira jadwalka barnaamijka waxbarashada ee laga heli karo WCNYPBS (Kanaalada: Hawada 24.1, Spectrum 1221, Verizon FiOS 11/511, DirecTV 24.1, iyo DISH 24). Kuwo badan ayaa imaan doono asbuucyada soo socda; isha ku hay webseetka degmada si aad u hesho xog dheeraad ah inta arintaani socoto.

Haddii aad tahay shaqaale caafimaad oo u baahan daryeelka ilmaha inta lagu jiro xirnaanshaha dugsiyada, fadlan wac (315) 446-1220 si aad u hesho xog iyo caawimaad dheeraad ah.

Nasiib wakan,

Laura Kelley

**Tusmada Waxbarashada ee Jadwalka Guriga ee Dugsiga Sare**

<b>Waqtiga</b>	<b>Hawlaha La soo jeediyay</b>
9:00-12:00	<ul style="list-style-type: none"> <li>• Cun quraac una diyaar garoow maalinta (tuushka, labiso, cadayo, iwm.)</li> <li>• 120 daqiiqo oo casharo aad akhrinayso (adoo adeegsanaaya adeegyada uu dugsiga ama degmadu ku siisay; waxaad waqtigan u qaybin kartaa qaybo yaryar oo 30-60 daqiiqo ah subixii oo dhan) <ul style="list-style-type: none"> <li>◦ Mawduucyada/Koorsada Dhijitaalka ah</li> <li>◦ Shaqada Xaashida/Beensilka</li> <li>◦ Akhriska iyo/ama Qorista</li> </ul> </li> <li>• 30 daqiiqo samee jimicsiga jirka</li> <li>• 30 daqiiqo oo nasiino ah</li> </ul>
<b>Waqtiga Qadada</b>	
12:30-3:00	<ul style="list-style-type: none"> <li>• 90 daqiiqo oo tacliin ah (adoo adeegsanaaya adegeyada uu dugsiga ama degmadu ku siisay) <ul style="list-style-type: none"> <li>◦ Mawduucyada/Koorsada Dhijitaalka ah</li> <li>◦ Shaqada Xaashida/Beensilka</li> <li>◦ Akhriska iyo/ama Qorista</li> </ul> </li> <li>• 30 daqiiqo samee jimicsiga jirka</li> <li>• 30 daqiiqo oo nasiino ah</li> </ul>